

Taariikh: 2023-02-03

Ku socota waaliddiinta

Infekshinnada bakteeriyada streptococcus ee dugsiyada xannaanada

Infekshinnada ay keento bakteeriyada Streptococcus waa ay ku badanyihiin carruurta dhigata dugsiyada xannaanada. Bakteeriyadu waxay keeni kartaa cune-xanuun, impetigo (busbus-doofaar), qandho guduud, infekshinka cijiyaha iyo daba furan (dheecaan ka socda xagga hoose ama dabada afkeeda, cuncun iyo casaasho). Waxay infekshinnadu noqon karaan wax kasta, laga billaabo kuwo aad u fudud ilaa iyo kuwo u baahan daryeel isbitaal. Carruur badan oo ku jirta da'da dugsiyada xannaanadu waxay Streptococcus ku sidaan cunaha iyagoo aan xanuunsaneyn. Caadi ahaan sididda bakteeriyada ee aan astaan cudur lahayn laguma daaweeyo antibiyootig.

Jidadka caabuqa iyo faafidda caabuqa

Bakteeriyadu waxay ku faaftaa qufaca, hindhisada iyo candhuufta, waxa loo yaqaan dhibic ku qaadsiin. Waxaa kale oo ay ku faaftaa is-gaarid ku qaadid, taas oo tusaale ahaan micneheedu tahay in ay gacmuhu taabtaan candhuuf ama dheecaanka meel dhaawacan. Waxay sidoo kale bakteeriyadu ku faafi kartaa nuugidda alaab-alaabey bakteeriyadu gaartay, ama shukumaan, boombalo-xayawaaneed ama marada diifka leesaga tiro. Waxay qaadataa 1-3 maalmood laga billaabo marka qofka la qaadsiyo ilaa uu cudurku ka soo ridanayo qofka. Infekshinnada maqaarku way ka faafi ogyihiin kuwa cunaha. Qofka leh calaamadaha cudurku wuu ka faafin ogyahay cudurka qofka caafimaadka qaba ee bakteeriyada sida. Maadaama infekshinnada streptococcus aad loo kala qaado waxaa xitaa cudurrada qaadi kara dad kale oo qoyska ka mid ah.

Daweyn

La xiriir rugta caafimaadka ee uu ilmahaagu ka qoranyahay si loo qiimeeyo xaaladdiisa, haddii loo baahdana loo daweeyo. U sheeg in infekshinka streptococcus uu ka jiro dugsiyada xannaanada.

Ma qasabbaa inuu ilmuhu guriga joogo?

Haa. Inta uu ilmuhu guriga joogayo waxaa u taliya astaamaha cudurka iyo dawada uu ilmuhu qaato. Marka uu canuggu qabo cune-xanuun iyo qandho guduud lagu daweynayo antibiyootig, wuxuu ilmuhu soo laaban karaa marka laba maalin iyo laba habeen la daweeyo ka dib haddii la arko saamaynta dawada, uuna ilmuhu wacnaan dareemayo. Haddii aan antibiyootig lagu daweyn waa in ilmuhu uu noqdaa astaan cudur la'aan inta aanu ku laaban dugsiyada xannaanada. Marka ay ku dhacaan infekshinnada maqaarku (impetigo, infekshinnada cijada iyo daba furan), waxay qaadan kartaa waqti dheer inta uusan ilmuhu noqon mid aan dad qaadsiin karin cudurka. Waa in ay nabarradu bogsoodaan, aysanna lahayn toxob inta uusan canuggu dib ugu laaban dugsiyada xannaanada, iyadoon daawaynta taas loo eegeyn.

Talooyinka nadaafadda

Waxaa faafitaanka cudurrada lagu xakameyn karaa in:

- Gacmahaaga iyo gacmaha ilmaha badanaa ku dhaq saabuun iyo biyo. Had iyo jeer gacmaha dhaq cuntada ka hor, gaar ahaan marka wax la cunayo middi, fargeeto ama qaadda la'aan (tusaale ismaris iyo furuuto).
- Qof buka ha la wadaagin koob, middi, fargeeto iyo qaaddo ama caday
- Cijiyaha ilmuhu ha gaa-gaabnaadaano mar walba, kana fogow rinjiga cijiyaha si ay u fududaato in ay nadiif ahaadaan mar walba.
- Ka fogaw inaad qoyska dhexdiisa ku wadaagtaan shukumaannada, hubi in qof kastaa haysto midkiisa.
- Beddel foodaraha barkinta iyo tuwaallada. Maalin kasta haddii ay finani wili wejiga ku yaallaan.
- Haddii ay finan jiraan, waa in intii suurtagal ah laga fogaadaa in la taabato finanka. Si fiican u dhaq gacmaha marka aad taabato finanka ka dib, tusaale ahaan marka aad dhaydo ka dib.
- Dhaq alaab-alaabeyda, boombalo-xayawaaneedka iyo waxyaabaha kale ee uu ilmuhu nuugo.
- Yaree khatarta uu infekshinku ku soo laaban karo adigoo beddelaya ama karkarinaya mujurucyada ilmaha iyo cadayga marka uu ilmuhu caafimaado. Haddii infekshinka lagu daweyo antibiyootig, waxaa saas la sameynayaa 3-4 maalmood daweynta ka dib.

Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah ee ku saabsan qandhada

guduudka, [ka akhriso bogga 1177.se](http://ka.akhriso.bogga.1177.se)

Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah ee ku saabsan cune-xanuunka,

[ka akhriso bogga 1177.se](http://ka.akhriso.bogga.1177.se)

Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah ee ku saabsan impetigo, [ka akhriso bogga 1177.se](http://ka.akhriso.bogga.1177.se)